
# Macluumaadka loogu talagalay dadka la xiriiray bukaanka Qaaxada (TB)



## Waa maxay sababta aanu kaala soo xiriiray wax ku saabsan cudurka qaaxada (Qaaxada)?

Waxaa laguu aqoonsaday inaad tahay qof la xiriiray qof qaba qaaxada. Maadaama ay tani tahay cudur infekshin leh, waxaa jirta waxoogaa khatar ah inaad qaaday jeermiska dhaliya Qaaxada. Sidaa daraadeed, waxaan ku talineynaa inaad qaadato waxoogaa baaritaano ah oo noo ogolaanaya jeegareyna inaad qaaday Qaaxada ama aad leedahay cudurka Qaaxada oo xiligiisa hore jooga. Iyadoo ku xiran natiijada, waxaa laga yaabaa inaan kugu la talino daaweyn ama dabagal dheeraad ah.

## Waa maxay Qaaxadu?

Qaaxadu waa cudur la daaweyn karo oo uu dhaliyo infekshinka *Mycobacterium tuberculosis*. Cudurku badanaa wuxuu saameeyaa sambabada, laakiinse mar marka qaarkood wuxuu saameeyaa qaybaha kale ee jirka, sida ganjidhada cunnaha , kelyaha, lafaha iwm.

## Laakiinse ma aqaan cid qabta Qaaxada!

Waxaa laga yaabaa inaadan aqoon qof la xiriiray qof qaba Qaaxada. Maadaama dhammaan Qaaxada loo daaweeyo si qarsoon, ma awoodno inaan kuu sheegno qofka kuu yahay. Si kastaba ha ahaatee, qofkaasi wuxuu u dhaqmay si masuuliyad leh wuxuuna kuu soo magacaabay inaad cudurka la xiriirtay.....

## Sidee baa dadku cudurka Qaaxada u qaadaa?

Jeermiska Qaaxada waxaa lagu faafiyaa hawada marka qof qaba cudurka Qaaxada sambabada ama qufaca cunnaha, uu hindhiso , heeso ama hadlo isagoo hawada ku sii deynaya dhibco yar yar . Dhibcahan yar yarka ah waxaa qaadan kara dadka kale.

Dadka badidiisu waxay Qaaxadu ku dhacdaa oo kaliya qof ay wakhti badan wada qaataan. Caadi ma aha inaad qof Qaaxo ka qaado ka dib markaad si kooban aan joogta ahayn ula kulanto. Qaaxadu **kuma** faafto alaabta guriga sida qaadooyinka, fargeetada iyo midiyaha iyo alaabta wax lagu kariyo sida digsiga ama taleefanada.

## Sidee baan ku garan karaa inaan qaaday cudurka?

Baaritaanada baarista ayaa lagu sameyn karaa Rugta Caafimaadla Xabbadka ee xaafadaada.

1. Baaaritaanka Maqaarka ee Qaaxada ( oo loo yaqaan Mantoux test). Kani cirbad yar oo ammaan ah oo lagaaga mudayo maqaarka gacanta xaggeeda hore. Waxay tusi kartaa inaad qaaday jeermiska Qaaxada. Waxaad u baahan doontaa inaad soo noqoto 2 ilaa 3 maalmood ka dib baaritaanka ka dib si natiijadaada loogu turjumo inaad qaaday ama aadan qaadin.
2. Mar marka qaarkood baaritaanka dhiiga ama baaritaan dheeraad ah oo ah baaritaanka maqaarka ee qaaxada ayaa laga yaabaa in la sameeyo si uu u caawiyo turjumaada natiijada ee baaritaanka koowaad.
3. Raajada xabbadku waxay tusi kartaa haddii ay leeyihiin caddeyn Qaaxo sambabadaadu. Mar marka qaarkood raajada xabbadku waxay tusi kartaa calaamadaha Qaaxo aad qabtay wakhti hore, xitaa haddii aadan ka warqabin inaad hore u qaaday Qaaxada.

## Waxaan qaatay tallaalka BCG. Miyuuna kaasi i ilaalineynin?

BCG kaliya wuxuu kaa siinayaa Qaaxada ilaalin qayb ah wuxuuna badanaa ka ilaaliyaa carruurta. Waad qaadi kartaa Cudurka Qaaxada xitaa haddii aad qaadatay tallaalka BCG.

## Maxaa dhacaya haddii aan baaritaanadeyda laga helin?

Haddii aan baaritaankaaga koowaad laga helin, baaritaanka waxaa laga yaabaa in lagu celiyo qiyaastii 2 ilaa 3 bilood ka dib. Tani waa sababta waxay qaadan kartaa dhawr toddobaad ka dib markaad la kulanto Qaaxada inuu *nidaamkaada difaacu falcelin ka sameeyo baaritaanka maqaarka. Sidaa darteed haddii baaritaan labaad lagu taliyo waa muhiim inaad u timaado baaritaankan si loo hubiyo inaadan qabin infekshinka Qaaxada*. Haddii baaritaankaagu noqdo mid aan waxba laga helin, badanaa uma baahan doontid baaritaano dheeraad ah.

## Ka waran haddii layga helo baaritaanka maqaarka ee qaaxada (Mantoux)?

Haddii baaritaankaaga wax laga helo, waxaa laga yaabaa in laguu gudbiyo dakhtarka takhasuska u leh Qaaxaada, iyadoo ku xiran qodobada kale iyo natiijada raajadaada xabbadka, oo uu kalkaaliyuhu kaala hadli doono.

Baaritaanka maqaarka ee qaaxada lagaa helo guud ahaan micnihiisu waxaa weeye inaad qaaday jeermiska dhaliya qaaxada. (mar marka qaarkood, waxaa dhaci doona baaritaano toddobaadle ah ee dadka qaatay tallaalka BCG ama sababo kale, oo aan la xiriirin infekshinka Qaaxada.) In baaritaanka laga helay uusan micnihiisu ahayn inaad qaaday cudurka ka dib xiriirkii dhowaa ee aad la yeelatay qof qaba Qaaxada. Haddii aad ku noolayd dal Qaaxadu ay caam ku tahay ka dib waxaa jiri karta sabab wanaagsan oo loogu fekero inaad infekshinka qabtay ilaa wakhti. Ugu dhowaan 1/3 tirada dadka ee aduunka waxay qabaan infekshinka Qaaxada, inkastoo ay aad dhif u tahay in dadka ku dhashay Australiya gudaheeda ay qabaan.

Qabida infekshinka Qaaxada ( baaritaanka maqaarka ee qaaxada) micnihiisu MA aha inaad qabto cudurka Qaaxada . si kastaba micnaheedu waxaa weeye inaad qabto waxoogaa khatar ah in cudurka Qaaxadu kugu koraya. Khatartan intay weyni le;egtahay waxay ku xiran tahay qodoba badan oo ay ku jiraan intay dhowaan leedahay wakhtiga aad infekshinka qaaday ( haddii si kale u iraahdo haaddii infekshinka aad ka qaaday xiriirkii aad dhowaan sameynsay), intaad jirto, inaad qabto xaalado caafimaad oo kale. Dhakhtarka ama kalkaalisada ayaa kaala sii hadlaysa tan adiga.

## Ma la daaweyn karaa infekshinka Qaaxada?

Infekshinka qaaxada waa la daaweyn karaa si loo caawiyo ka hortaga koritaanka cudurka qaaxada mustaqbalka. Daaweyntan guud ahaan waxay ku lug leedahay qaadashada mid ka mid ah daawada aan u isticmaalno daaweynta dadka qaba cudurka Qaaxada (isoniazid) maalin kasta lix ilaa sagaal bilood. Daaweyntu waa wax ku ool 60% ilaa 90% xagga ka hortaga cudurka Qaaxada ee dadka qaba infekshinka Qaaxada. Daaweyntan guud ahaan waa ammaan, gaar ahaan dadka dhalinyarada ah. Haddii dakhtarkaagu kugula taliyo daaweyntan , isaga/iyadu waxay kuu sheegi doonaan wax badan oo ku saabsan faa'iidooyinka iyo khataraha daaweyntan.

## Miyey jirtaa wax bedel ka ah qaadashada daaweynta haddii aan qabo infekshinka Qaaxada?

Haa , haddii khatartaada ah inaad qaado cudurka Qaaxadu ay hooseyso ( iyo gaar ahaan haddii khatarta waxyeelada daaweyntu  AYSAN hooseyn), ka dib waxaa laga yaabaa inay macquul noqoto inaad qaado talaabada ah "sug oo arag". Talaabadan waxaan badanaa ku talineynaa raajada xabadka oo dabagal ah wakhtiyo googa'an oo ah labada sanno ee soo socoata. Waa muhiim inaad ka warqabtid calaamada hore ee cudurka Qaaxada ee laga yaabo inay dhacaan wakhti kasta inta lagu jiro ama xiligan ku dabagalka raajada, iyo inaad aado Rugtaada Caafimaadka ee Xabadka haddii calaamadahani dhacaan.

## Ka waran haddii aan waxoogaa su'aalo ah qabo?

Haddii aad qabto wax su'aalo dheeraad ah, ama aadan fahmin qaar ka mid ah macluumaadka waraaqahan ku qoran, fadlan weydii inaad la hadasho mid ka mid ah dakhaatiirta ama kalkaaliyayaasha Rugta Caafimaadka Xabbadka  oo ku farxi doona inuu kuu sharxo waxyaalo adiga.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Qaaxada fadlan weydii Rugta Caafimaad  Xabbadka nuqulka  NSW Health Tuberculosis Fact Sheet ( warqada Xaqiiqda Caafimaadka Qaaxada ee NSW)

http://www.health.nsw.gov.au/Infectious/factsheets/Pages/Tuberculosis.aspx

http://www.health.nsw.gov.au/Infectious/tuberculosis/Pages/tuberculosis-factsheets.aspx

(Macluumaadka luuqadaha kale ee aan Ingiriiska ahayn)

Faahfaahinta xiriirka Rugaha Caafimaadka ee Xabbadka ee NSW waxaa laga heli karaa cinwaankan internetka ee soo socda:

http://www.health.nsw.gov.au/Infectious/tuberculosis/Pages/chest-clinics.aspx